



## **World G18 Somalia**

*Bulshada Qurba-Joogta Somalida*

*Ee u Shaqaysa in Somalidu*

*Ku noolaato Nolol Sarraysa Dhammaantood.*

**FARRIIN KU SOCOTA HOGGAAMIYAYAAHII KA QAYB  
GALAY SHIR-WEYNIHII SOOMALIDA EE LONDON 23KII  
FEB-2012.**

Waxaannu idin dareensiinaynaa qodob laga reebay inuu ku soo baxo go'aanadii qoraalka ahaa ee ka soo baxay shirkii London, kaasoo ahaa doorka qurba-joogta Soomaalida.

Qurba-Joogta Soomaalida ee ku filiqsan caalamku waa kuwa ugu badan ee bixiya deeqda dhaqaale iyo maskaxeed ee caalamku siiyo Soomaalida isla mar ahaantaana qayb libaax ka qaatay wada tashiyadii dhacay shirka horteed. Waxa layaab noqotay in qoraal murtiyeedkii shirka ka soo baxay aanay ku jirin doorka ay ka qaateen qurba-joogta (Diaspora), in kastoo qodobadii ka horreeyey ee ay ku wax qaateen madaxda timid shirka kana soo baxay Wasaaradda Arrimaha Dibadda Ingriiska, sida badanna loo shaaciyey lagu xusay doorkooda.

Ka reebistaasi oo ah mid aanu aad uga xunahay ayaa ah mid wax u dhimaya baaqistii iskaashiga iyo wada shaqaynta ee beesha caalamka iyo qurba-joogta. Inta qodobkaasu maqan yahay ma noqon doonto in iskaashigaasi horumar gaadho. Sidaa darteed waxa muhiim ah in dib loo saxo oo sida hoos ku qoran ee ay u diyaarisay World G18 Somalia loogu daro go'aanadii kama dambeynta ahaa.

**[Qoraal MurtiyeedkiI Qabanqaabada]** Waxaanu aqoonsanahay doorka muhiimka ah ee qurba-jooqta iyo ururrada bulshada Sommalidu ay ka qaataan horumarinta arrimaha siyaasadda, dhaqaalaha, nabad gelyada, iyo xaaladaha bani-aadanimu. Inkastoo ka qaybgalayaasha shirka loo qoondeeyey dawlada iyo ururrada caalamiga ah, hadana fikradihii wada tashiga qurba-jooqta waxay dhaceen shirka hortii.

**[Ku dar Qoraal Murtiyeedka cusub]** Waxa mudnaan mudan oo aanu aqoonsanahay doorka iyo xaddiga dhaqaale ee qurba-jooqta ay ugu gargaarto dadkooda Soomaaliyeed, si toos ah oo aan qarsooneynna ay ugu baxdo meelaha ugu habboon. Waa middan ta qurba-jooqta Somaalidu ay ka dhaxleen khibrado dheeraad ah iyo xidhiidh adag oo calamiya iyo mid dalka gudihisa ahba oo ay la yeesheen gobolada, waxgaradka iyo hoggaamiyayaasha bulshada. Waanu isku raacsanahay in dib loo eego iskaashina lala sameeyo qurba-jooqta, wada shaqayn dhowna lala sameeyo iyada oo la dhiiri gelinayo ka qayb qaadashada mashaariicda horumarineed lana laalo caqabadaha maamul ee hakin kara wada shaqayn guud oo lagu najaxo.

**[Ku dar Qoraal Murtiyeedka]** Waxaanu isla garanay oo ka dhursugaynaa in wada shaqayn iyo iskaashi lala yeesho guddiyada qurba-jooqta iyo ururrada bulshada oo ay ka qayb-qaataan dhismaha mustaqbal wanaagsan oo Soomaaliyeed.

**1<sup>st</sup> March 2012**